
“Iska Suubi”

**Warbixinta la Tashiga Bulshada ee ku saabsan
Qorshaha Wax Qabadka ee
Ciribtiridda Midab Kala Soocidda iyo Takooridda**

Soo Koobid

Noofembar 2002

Somali

Hordhac

Kala duwanaanta waa dhabeecadda ay ku saleeysantahay magaaladeena. Taasina waxay si weyn ugu kordhineysaa magaalada Toronto tayo, sharaf qiima leh, ee lagu faano iyo mudnaan in la siiyo kala duwanaanta. Aqoonsiga la aqoonsaday kala duwanaanteeda ayaa magaalada Toronto ka dhigtay in ay ka mid noqoto magaalooyinka ugu wax soo saar badan, ugu tixgelin badan, iyo ugu horumarsan ee aduunka.

Marka laga gudbo guulaha ay gaartay, hadane in badan oo ka mid ah dadka deegaankan, si buuxda ugama qeyb galaan howlaha ka socda degmooyinkooda. Si taasi loo beddelo waxaanu bilownay hab la tashi ah bishii May 2002, taasoo degganayaasha Toronto lagala tashaday Qorshe Howleedka Magaalada Toronto ee Ciribtirka Midab Kala Sooca iyo Takoorkaba

Waxaa habkan la tashiga ah ka soo qeyb galay in ka badan 1,000 dad, iyadoo yimid shirka la tashiga bulshada, shirarka Guddiyada la Tashiga, Kooxaha Wada Shaqeeya, iyo soo gudbinta qoraalada iyo soo jeedinta khudbooyinkaba.

War bixintaan waxay soo koobeysaa waxaanu ka maqalnay la tashiyadaan.

Tilmaan Bixin

Guddiga Farsamada waxay ogaadeen in badan oo ah dadkii ay la kulmeen iyo ururadiiba ay soo jeediyeen cabashooyin isku mid ah ama isu dhow. Waxaa jiray arrimo soo noqnoqanayay ee ku saabsan sidii loo kala mudneysiin lahaa wax ka qabadka iyo tubta ay Maamulka Magaaladu uu qaadan lahaa fulinta Qorshaha Waxqabadka.

Hoggaaminta Siyaasadda

Waa in uu si muuqata ugu horseedaan in la dhiso mujtamac isku dhafan oo u dhan taasoo lagu muujinaayo qoraalada himilooyinka si loo tixgeliyo kala duwanaanta marka laga eego dhinac walba ee nolosha magaalada.

Waa in uu u horseedaa in uu abuurmo urur tixgelinaaya, aqoonsanaayana iin kooxo kala duwan ay soo mari karaan xaaladaha takooridda, taasoo lagu saleeynaayo dhowr arrimood oo isku dhafan ee ka mid ah aqoonsigooda, sida jinsigooda, sinjigooda, kartila'aantooda, iyo habka galmadooda.

Waa in uu amraa hey'adaha faraha badan ee ay leedahay maamulka magaalada madaama ay tahay midda sameysa xeerarka, dadka shaqaaleeysa, bixisa lacagaha maalgelinta, ka shaqeysa dhowrida iyo toosinta, iyo iyadoo iibsata badeecadaha iyo adeegyada, in la xaqiijiyo simidda bulshada.

Waa in loo qoondeeyo hanti tiirisa mashaariicda bulshooyinka, isla markaasna wax ka qabata baahida dadka tabarta daran..

Waa in la sheego si kasta ha ku yimaadee wax alaale wixii takoor iyo kala sareynba ah.

U doodid

Waa in uu u dodo sidii looga heli laha qeybaha dowladda, sharciyo, maalgelin iyo mashaariic lagu taakuleeyo bulshooyinka, gacan ka geysto ka qeybgallidda dhaqaalaha isla markaasna bixisa adeeg wax ku ool ah.

La aqoonsado oo hadana la taakuleeyo taariikhda aan wax lala dhigo laheeyn iyo kaalinta dadka Asaliga ah (Aboriginal) iyo xuquuqda ka tashiga qolo walba aayaaheeda.

Waa in la sheego sidii loo baabi'in lahaa caqabadaha hortaagan kooxaha kala duwan iyo bulshooyinka aan muuqanin, lagana shaqeeyaa sidii aysan u dhicin aqabad dheeraad ah.

Waa in la abuuraa ku shirkoobid howlo si loo dhiso mujtamac dhan ee cid walba ka muuqata.

Ka Qeyb Galka Dhaqaalaha

Waa in la taakuleeyo sidii si buuxda ay bulshadu uga qeybgali laheed howlaha dhaqaale ee ka socda magaalada.

Waa in la hubsado jiritaanka taakuleyn habboon oo u sahleysa bulshada oo idil ka qaybgalka dhinaca dhaqaalaha ama guryaha, xanaanada caruurta, borogaraamyada aqoonta iyo waxbarshada afka ingariisiga, gadiidka iyo guryo qarashkoodu la kari karo.

Waa in la hirgeliyo tabaha u sinaanta shaqo helidda, si loo xaqiijiyo in xoogagga shaqaalaha magaalada ay ka muuqdaan dhamaan bulshooyinka kala duwan

Waa in la aqoonsado wax ka geysashada dhaqaalaha magaalada ay ka geysaneyso bulshada kala duwan ay wax ka tareyso kaalinta magaalada ka galeyso dhaqaalaha aduunka.

Waxbarashada iyo Baraarujinta Guud

Lagula hadlo mabaadii' cad-cad marka laga hadlaayo muhimadda kala duwanaanta.

Waa in la hirgeliyo ololeyaal iyo mashaariic oo dadka deegaanka ka wargelinaaya adeegyada jira, xuquuqdooda iyo masu'uuliyadda saranba.

Waa in kor loo qaado is fahmidda, is ixtiraamka, iyo is dhexgalka bulshooyinka kala duwan.

Waa in la sameeyo lana qeybiyo qoraalo qoraayo ka qeybgalka bulshooyinka howlaha hor-umarinta magaalada Toronto.

Bixinta Adeegyada

In la xaqiiji borogaraamyada iyo adeegyada ay waxtar u yihiin baahida bulshooyinka kala duwan, waxna uga faai'iideysanaayaan si siman dhamaan dadka deegaanka.

Laga qeybgeliyo bulshooyinka sameynta xeerarka iyo shuruucda, iyo kala mudnaanta adeegga la bixiyo.

In la bixiyo adeegyo ku jaan go'an baahida bulshada ee hadba isbeddeleysa.

Dhisid Bulshooyin Xoog Leh

In lagu dhiirigeliyo ururada in ay suurageliyaan, in bulshooyinka la maqlo codadkooda.

In maal loo qoondeeyo bulshooyinka kor u soo muuqanaaya, si ay ugu suuragal noqoto in ay ka qeyb galaan arrimaha ka socda degaankooda fikradna ka dhiibtaan, iyagoo si habeysan ku imaanaaya.

In la hormariyo barashada qoraalka iyo akhrinta, iyo barashada afafka rasmiga ah, si bulshadu ay u awoodo in ay ka qeybgasho horayna ugu maro mujtamaca dhexdiisa.

Masuuliyad

In la xoojiyo sidi codka bulshada uu uga mid noqon lahaa xubin habka go'aan-gaaridda maamulka magaalada.

In la sameeyo cilmi baaris lana faafiyo xog warran lagu kalsoonaan karo, taaso looga jeedo in lagu dabagalo si loo qiimeeyo xaalad ay kooxi ku sugan tahay iyo in laga sameeyo shuruuc, iyo hab loola dagaalamo midab kala sooca iyo takoorkaba.

In la sameeyo tilmaamayaal, hab wax lagu qiimeeyo, iyo in la joogteeyo warbinada si loo sameeyo dabagal loona qiyaaso hirgelinta Qorshe Howleedka.

Nalaso Xariir:

Boosta ahaan:

Plan of Action for the Elimination of Racism and Discrimination
c/o Diversity Management and Community Engagement,
Strategic and Corporate Policy/Healthy City Office,
Chief Administrator's Office,
City Hall, 11th Floor East,
100 Queen St. West, Toronto, ON
M5H 2N2

ama fakis: 416-696-3645

ama e-mail: diversity@toronto.ca

ama Taleefoon: 416-392-8592

ama TTY: 416-392-0889

Multilingual Services: Access Toronto ka soo wac 416-338-0338

Warbixinta oo dhan, “ Warbixinta La Tashiga Bulshada ee Qorshaha Wax Qabadka ee Ciribtiridda Midab Kala Sooca iyo Takooridda”, waxaad ku heleysaa isagoo ingiriisi ku qoran, nuqulo far waaweyn lagu daabacay, nuqulo farta caadiga ah, iyo mid disket ku jiraba, ee soo wac: 416-392-8592